JUMHUURIYADDA SOOMALILAND

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2017

# AF-SOOMAALI

20
17

GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA

SomExams

Total score

Name ……………………………………..

School……………………………………..

Roll No……………………………………

Republic of Somaliland

Somaliland National Examination Board

Form Four

# IMTIXAANKA

# AF-SOOMALI

## July 2017

**Waqtiga 2 Saacadood**

**10 daqiiqo oo dheeraad ah ku akhri dhammaan waraaqaha si aad u hubiso.**

**TILMAAMO:**

Imtixaanku waxa uu ka kooban yahay 14 waraactood oo daabacan.

Tiri imminka, oo wargali horjoogaha haddii ay wax kaa macian yihiin ama ay dheeraad yihiin.

| | |
|---|---|
| **QAYBTA 1: GOOBO GELI QAYBTA** | **20** Dhibcood |
| **QAYBTA 2: MAANSO** | **20** Dhibcood |
| **QAYBTA 3: HUMAAGYO** | **10** Dhibcood |
| **QAYBTA 4: MAAHMAAHYO QAYBTA** | **18** Dhibcood |
| **QAYBTA 5: NAXWE** | **12** Dhibcood |
| **QAYBTA 6: CURIS** | **20** Dhibcood |
| **WADAR GUUD** | **100 Dhibcood** |

**<u>Bogan u adeegso dheeerad ahaan lama saxayo waxa ku qoran</u>**


©SLNECB, 2017

☞ www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

# KALIIL IYO HANFI

Waxa ay ka wada qalin jibiyeen kuliyad isku mid ah. Labaduba waxa ay ahaayeen jaar wanaagsan xaga fasalka. Waxay ay Tahaayeen is-walqaafaysi toos aft Dhinac kasta oo la eego waxa ay lahaayeen xidhiidh dhow.

Waxa kale oo xus mudnaa meel joogsiga, haybadda iyo haykalka guud. Maalinba ka timojaraha ku dambeeya ayaa in yar ka sitay kan kale. Huggana waa ay isu dookh dhowaayeen. Hadal iyo dhammaantii waxa lagu xaman jiray saaxiibbo isku milmay waa aragga guude. Waxa ay balo ka dhacday dhinaca geel la daaqda oo ay cir iyo dhul isku ahaayeen. Kalil' waa nin deggen oo aad waxa u fiiriya. Hanfi se waa fukucle rag oo aan weligii talo gadhoodhin. Inkasta oo uu aqoon ku filan lahaa, waxa hoosta xaro dhaaminaayey in yar oo kibir ah. Waa halka sartu ka qudhuntay.

Daymada tukaha ayaa uu lahaa, dareenka wiyishana waa uu baro dhaafiyey. Kaliil se hayin caano madaadshe ah ayaa uu ahaa. Dulqaadkiisa waxa la odhan jiray, waa garyaqaan qareen ku talax tegey. Ereyga afkiisa ka soo baxaya iyo adinkiisa halka uu dhigaayo ilaa uu hubiyo ma talaabsan jirin. Dadka waaweyni waa ay Kaman jireen oo koolkaolin jireen. Laakiin dhallinyaradu waxa ay ku tilmaami jireen nin bahardaadsan. Waxa uu xeerin jirey san-ku-neefle dhammaantii, ha yaraado ama ha weynaadee.

Weligii ma dhaafin laba shay 00 isku xadgudbaaya xataa haddii ay laba cayayaan yihiin ilaa uu kala jiheeyo. Hanfi bay noqotay weligii iyo waaqii laba ma dhexdhexaadin; waa uu hiifi jiray oo haaraami jirey, wixii is-haysta oo uu la kulmo. Qofka labadaba yaqaan waa uu la amakaagi jiray sida ay isu af-gartaan. Hooyadii iyada oo aan hubsan ayaa ay u bixisay Kaliil.

Waxa keliya oo ay maanka ku haysay maalintii uu dhashay 00 ahayd Arbacadii la baxday Cadaab- hoomey. Hanfi se waa ay la heshey habartii dihatay. Waa ay u eexatee waxa ay ugu dari lahayd Shide, Shay-waal, Karaaye iyo Dhuxun-ku-reeb. Kaliil waxa isna loogu dari lahaa Miyir, Miisaan iyo Waayeel. Amminta ay soo wada booqdaan asxaabtooda waxa ay dadku hoos u kala odhan jireen " Meeshaada iyo meel ka dheer iyo malaa'iigtu ha ku Soo gaadho". Kaliil iyo Hanfi waxa u dhexeeyay boqolaal dabeecadood oo kala duwan. Waxa ay wadhi ka raacday habeen ay martiyeen qayro wada ool ahayd. Waxa boo goglay ardaa aad looga shaqeeyey. Muddo haddii ay fadhiyeen ayaa uu Hanfi qayliyey oo yidhi

"Waar miyaan wax cunto ah is soo wadin"

Kaliil oct naxsan ayaa kacay oo eegay bal in ay cidi macilaysay weedhii.

Hanfi baa ku celiyay oo yidhi : " waa maxay reerkan na hoday, ardaaga ma ilaaliye ayaa aanu ka nahay".


©SLNECB, 2017

**Qaybta 1aad: Goobaabo geli jawaabta keliya ee Saxda ah. (20 dhibcood)**

1- Hanfi iyo Kaliil waxay ka wada qalin jebiyeen:

B) Kuiyadda waxbarashada

T) Kuliyada isku mid ah

J) Kulliyadda caafimaadka

X) Kulliyadda Sayniska

2-" Is-walgaafaysi" waxa looga jeeda :

B- Iskaashi iyo iska war hayn

T- Is ilaalin

J- Is xanaanayn

X- Ismaqal

3- Kaliil waxa uu ahaa :

B- Hawlkar jaanfudud

T- Oday waayo-arag ah

J- Hayin biyo madaadshe ah

X- Hogaamiye macangag ah.

4- Hanfi waxa uu ahaa:

B- nin la jecel yahay

T- nin la neceb yahay

J- nin dul badan

X- nin dantii garad ah.

5- Erayga " Kuunyid" Waxa kale oo la mid ah :

B- Maagid

T- Muquunin

J- Masanuunin

X-Cawri


©SLNECB, 2017

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

6) Kaliil waxa uu dhashay arbacadiii loo bixiyay :

B- Cadaab-hoomey

T- Adhigaba

J- Dooryaanle

X- Dirxiile

7) Hanfi iyo Kaliil waxa u dhexeeyey :

B- Arrin adag

T- Xinif hare

J- boqol dabeecadood oo kala duwan

X- Colaad hoose

8) Kaliil waxa uu ahaa :

B- Nin hubsiimo badan

T- Nin hanfade ah

J- Nin dabeecad xun

X- intaba.

9) Magacyada kala ah , Hanfi, Side, Dhamac, Dhimbiil, Suudi iyo Halas waxay ay tilmaamayaan:

B- Colaad

T- Abaar

J- Kulayl iyo dabeecad xun

X- intaba.

10) " Nin soori kaa qaaday , waa nin seefi kaa qaaday" maahmaandan dulucdeedu waa:

B- Nin kasta oo seefi dishay wuu dhintaa

T- Qof kasta oo aan lahayan limaan uu isku qabto waxa uu la mid yahay qof seefi kala jartay oo dhintay

J- Qof kasta oo xumi waa uu dhintaa.

X- Intaba,


©SLNECB, 2017

11) Aragtida guud ee laga qabay Hanfi iyo Kalill waxa ay ahayd:

B- in ay yihiin col daahii go'ay

T- inay yihiin rag kala dambeeya

J- inay yihiin saaxiibo isku mid ah

X- inay yihiin dad ehel ah.

12) Hanfi magaciisa hooyadii waa ay :

B- u kitaab dayday

T- la seegtay

J- la raagtay

X- la degdegtay.

13) Daymada tukaha ayaa uu lahaa , dareenka wiyishana waa uu baro dhaafiyey.

Waxa looga jeeda :

B- Dabeecad xun

T- Dareen yar

J- Dafdaf badan

X- Degdeg badan.

14) Kaliil waxa uu xeerin jiray :

B- Dadka waaweyn

T- Caruurta

J- Dadka laxaadka la'

X- Intaba.

15)" Hayaan waxa uu ahaa nin aan weligii talo gadhoodhin " waxa looga jeeda :

B- Nin aan weligii talo qaadanin

T- Nin aan weligii wax qabsan

J- Nin aan weligii taladlisa ku meel marin

X- Nin aan weligii wax dhegaysan.


©SLNECB, 2017

16)" Qayro wada ool ah"waxa looga jeedaa :

B- Beelo badan.

T- Beelo wada yaal

J- Beelo xoolo dhaqato ah

X- Beeralay.

17) " Wadhi" waa erey u taagan:

B- Canaan

T- Weedh

J- Ceeb

X- Tilmaamo.

18) Dabeecadaha dadka waxa ugu xun :

B- Degdegga

T- Doqonimada

J- Kibirka

X- Kudayashada.

19) Hanfi iyo Kaiiii waxa ay ka sinaayeen:

B- Dabeecadda

T- Magta

J- Magaca

X- Haykalka guud.

20) hanfi iyo Kaliil waxa ay ku kala duwanaayeen

B- Dabeecadda

T- Dedaalka

J- Aqoonta

X- Marti soorka.



©SLNECB, 2017

☞ www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

Qatbta 2aad : **MAANSO** **( 20 dhibcood)**

1) Isbarbardhig tuducyadan dulcdooda ;

b- Arday yahay aqoonsada cilmiga aafo waa jahale

t- Ijtihaada idinkaa hor kici aradka Soomaali

Alkhlaaq xumo iska ogaada waad ka ambanaysaane

****** ***** **** *****

j- Arday yahay cilmigu waa iftiin Aadamaha hag'e

Marna waa awood aad fiikaa kaga adkaataaye

Waa sida aroor iyo shamsiyo oogta waaberiye

Anbadkiyo wuxuu ka jiraa inaad asqowdaaye

..........................................................................................
..........................................................................................
..........................................................................................
..........................................................................................

2) Falanqee dulucdooda tuducyadan

Anagaaba reer hebel ah iyo haybta ka adage

Hayaydii bedela waa wixii hoos inoo ridaye

Hengeshii xumayd iyo dilkii haatan ka xishooda

Halyaygeena dhaqa waydinkii haadka siin jiraye

..........................................................................................
..........................................................................................
..........................................................................................

3) Si kooban u sharax dulucdooda tuducyadan :

Hal la weriyey Sheekh iyo Wadaad waracyadii diinta

Culimada warkay sheegtay iyo wanaadaa dhabe ehe

Wacdina nooma laabnee naftaa walaftay shaydaane

..........................................................................................
..........................................................................................
..........................................................................................
..........................................................................................



©SLNECB, 2017

☞ www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

4) Faalio ka bixi dulucdooda meerisiyadan

Ambaqaadaka geediga Sida awrta loo raro
Heesaha u gaarka ah Waxa lagu aloosaa
Magac eebeheen iyo Addin iyo of wada jira

……………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………

**5) Isla doono qaybta B iyo qaybta T sida ay isugu habboon yihiiin**

| | B | T |
|---|---|---|
| 1 | Erayga " suugaan " waxa loo yaqaanay | |
| 2 | Tixdu waxa leedahay | |
| 3 | Fanka Soomaalida ee casriga ahi waxa uu ka soo bilaamay | |
| 4 | Balwadda waxa ay ka soo jeeda | |
| 5 | Balwaddu waagii dambe waxa ay isu bedeshay | |

**T**

b- Tixii balwadda ahaa ee Cabdi- Sinimoo

t- Heelada

j- Hirwada / dhaantada

x- Meelaha dhirteedu caleenta qoyan leedahay

kh- Xaraf-raac



©SLNECB, 2017
☞ www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

**Qaybta 3aad** : **Humaagyo / Af-maldah.** **( 10 dhibcood)**

1) Ka soo saar tixahan humaagyada ku jira oo ku hor gar:

1- Nolosha dunidu waa dabkee
Haddii dabkii dhaxamoodoo
Maxaa lagu diiriyaa

..................................................................................

..................................................................................

2) Hiyigiyo shucuurtiyo codkii haadda kicinaaya .
Haasaawihii Timacadaan hibanayaa qaare

..................................................................................

..................................................................................

3) Taaha adhiga waa hadal

..................................................................................

..................................................................................

..................................................................................

4) Geela weer irmaaniyo
Weristii rimanaydiyo
Waa albun erydaaye
Wabar xoog leh miyaa ?

..................................................................................

..................................................................................

5) Inteenii kaloo maqan
haddaad Xamar israacdeen
idinkoo itaal daran
waa la arkii doona

..................................................................................

..................................................................................

..................................................................................


©SLNECB, 2017
☞ www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

## Qaybta 4aad: Maahmaahyo iyo hees hawleedyo . ( 18 dhibcood)

### B) Maahmaahyo

1) Midee dulucdooda labadan maahmaahood:
   b- Dayn hore deeq kama dhacdo.
   t- Maxaad joogtaana jidhkaaga way bishaa

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

2) Soo koob dulucda maahmaahdan " Waysha gawrac dibigu haku quustee"

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

3) b. labaatan jir wixii kugu raacay lixdan jir kaamaga hadho
   t. Inta ay dhogortaadu dhan tahay ayaa la dhowrsadaa.

   - Falanqee waxa ay ku kala duwan yihiin labadan maahmaahood.
   - -----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

Activ
Go to



©SLNECB, 2017
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

## T) Hees Hawleedyo

1) Afar wiil kuu olkeeyiyo        afyaraw ceel waa Ayaan kaaa

Oo adigaa iska leh

b- maxaa loogu heesa ……………………………………………………………………..

t- Goorma ayaa loogu heesa ………………………………………………………………….

2)intay gabanada gaamurayaan        waaba labo guye maan aanbu galo

b- Falanqee dulucda heestan

………………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………..

………………………………………………………………………………………………………

3) haamahaagu hiiirta waaberi        hindhaadhiri jiray way harweenooo

Heed la tumay iyo hadhuudh lagu shubay

b- maxaa looga jeeda?

………………………………………………………………………………………………………

t-  maxaase loogu heesa

………………………………………………………………………………………………………



©SLNECB, 2017

☞ www.somexams.com    info@somexams.com    © In cooperation with www.qalinqaad.com

## Qaybta 5aad : Naxwe 12 dhibcood

1) Waa maxay farqiga u dhaxeeya yeele iyo layeele

……………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………

……………………………………………………………………………………………………

2) Si kooban u sharax erayga "Fal"?

……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………

3) Ninkii markii uu habeen iyo maalin lug ahaa ayaa isagoo kabna lulaya kabna laalaadinaya ku gataadi dhacay meel agtood ah

b- dib u aqri weedhan oo u samee sumadaha ka maqan

……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………

4) Aaad buu u dadaalay imtixaankii inuu ku guulaysto ayuu rabay
b- kasoo saar weedhan sumadaha dheeradka ah una qor sida saxda ay ku tahay

……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………


©SLNECB, 2017
☞ www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com

## Qaybta 6aad : Curis — 20 dhibcoood

**b- mid kamida dooro labadan qodob kadibna ka qor curis ka ku haboon ugu yaraana (200) oo eray**

1) **Mustaqbalka waxa aad noqon doontid**
2) **Labaatanka sane ee soo socda saadali Somaliland**

**Curis**

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

………………………………………………………………………………………………

**Dhammaad**



©SLNECB, 2017

☞ www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with www.qalinqaad.com